

# HINDISAH TILMAAMAYAASHA-KU DARIDA CARRUURNIMADA HORE EE OREGON WARBIXINTA SANADLAHA



Macluumaadka uu soo ururiyay Meredith Villines, MS anigoo ka wakiil ah

KOOXDA HOGAAMINTA GOBOLKA EE KU DARIDA CARRUURNIMADA HORE EE OREGON

<b>Shaxda Tusmooyinka</b>	
Shaxda Tusmooyinka .....	1
<b>Dulmar.....</b>	1
Hawlaha Hirgelinta ilaa maanta: .....	3
<b>Ku darida Carruurnimada Hore ee Oregon Kooxda Hogaaminta Gobolka.....</b>	4
Soo koobitaanka Hawlaha Ay Kafaala qaadeen Kooxda Gobolka.....	7
<b>Kooxaha Isku-dhafka Bulshada .....</b>	10
<b>Kooxda Isku-dhafka Bulshada Lincoln .....</b>	11
<b>Kooxda Isku-dhafka Bulshada Clackamas.....</b>	13
<b>Kooxda Isku-dhafka Bulshada Multnomah .....</b>	16
<b>Soo koobida .....</b>	18

Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir:

Meredith Villines,

Takhasuslaha Xeeladaha Wadajirka ah ee EC

[meredith.villines@ode.oregon.gov](mailto:meredith.villines@ode.oregon.gov)



Kooxaha isku dhafka ah ee soo socda ayaa dib u eegay warbixintan, laga soo ururiyay xogta hindisaha, dukumentiyada, iyo qoraalada iyo agabka shirka:

### **Ku darida Carruurnimada Hore ee Oregon (OECI) Kooxda Hogaaminta Gobolka:**

Kara Williams, Agaasimaha Adeegyada Loo Dhanyahay (ODE)

Cindy Ryan, Madaxweynaha Oregon Qaybta Carruurnimada Hore, Kulliyadda Jaamacadda Galbeedka Oregon

Christy Reece, Agaasimaha Fulinta FACT Oregon (Xarunta Macluumaadka iyo Tababarka Waalidka Oregon ee IDEA)

Ben Hoffman, Agaasimaha, Xarunta Oregon ee loogu talagalay Carruurta iyo Dhallinyarada qaba Baahiyaha Gaarka ah ee Caafimaadka (OHSU)

Angela Jarvis-Holland, Agaasimaha Fulinta ee Shabakadda Taageerada Naafada Waqooyi-galbeed/Dhammaan Ku Dhashay

Andi Bales-Molnar, Takhasuslaha Nidaamyada Waxbarashada Xirfaadeed (ELD)

Eric Wells, Agaasime, IDEA Qaybta B

Carmen Ellis, Agaasimaha, Kooxda Nidaamyada Bulshada (ELD)

Gwynn Bachtle, Agaasimaha, Barnaamijaya Waxbarashada Hore (ELD)

Lindsay Pearson, Oregon Dugsiga Barbaarinta ka hor iyo Takhasuslaha Maskax-layliska Hore (ELD)

Valeria Atanacio, Xiriirkha Arimaha Qabiilka Waxbarashada Hore (ELD)

Melinda Benson, Iskuduwaha Barnaamijka iyo Hoggaanka Tababarka ee Iskaashatada Loo Dhan Yahay (ODHS)

Marina Merrill, Agaasimaha Cilmi-baarista iyo Xeelada (Machadka Carruurta)

Mindi Helmandollar-Armatas, Iskuduwaha Fasalka-3aad ee Dugsiga Barbaarinta ka hor (ODE)

Hadiyah Miller, Madaxweynaha Ururka Oregon ee Waxbarashada Caruurta Yaryar (ORAEYC) iyo xubinta Aasaaska ee Kobcinta Ilmaha Madow-PDX

Cherisse Gordon, Adeegyada Loo Dhanyahay (ODE)

### **Tababarayaasha Barnaamijka OECI (hadda; dhammaan Tababarayaasha Barnaamijka waa gayb muhiim ah oo ka mid ah KBooxaha Ku Darida Bulshada iyo Kooxaha Hogaaminta arnaamijka):**

Mackenzie Weintraub, Degmada Clackamas

Molly Hulett, Degmada Clackamas

Jill Luther, Degmada Lincoln

Trish Roussel, Degmada Lincoln

Tim Andrews, Degmada Multnomah

Melinda Benson, Degmada Multnomah

Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir:

Meredith Villines,

Takhasuslaha Xeeladaha Wadajirka ah ee EC

[meredith.villines@ode.oregon.gov](mailto:meredith.villines@ode.oregon.gov)



## Hogaamiyayaasha Kooxda Isku Dhafka Bulshada OECI (CIT):

### Clackamas CIT:

Sara Snow, Kaaliyaha  
Agaasimaha Barnaamijaya  
Waxbarashada Hore ee  
Clackamas Adeegga  
Waxbarashada Degmada (ESD)  
  
Brett Walker, Kaaliyaha  
Agaasimaha Barnaamijaya  
Waxbarashada Hore ee  
Clackamas ESD  
  
Jon Morris, Iskuduwaha loogu  
talagalay EI/ECSE ee Clackamas  
ESD  
  
Laura Goodman, Iskuduwaha  
EI/ECSE ee Clackamas ESD  
  
Lori Prater, Iskuduwaha  
Carrunimada Hore ee barta  
West-Linn Wilsonville  
  
Robi Osborn, Waaxda  
Waxbarida iyo Waxbarashada  
ee ka hogamiya Clackamas  
ESD  
  
Dani Stamm Thomas,  
Agaasimaha Xarunta  
Waxbarashada Hore  
  
Ali Takkunen, Maareeyaha  
Adeegyada Waxbarashada,  
CCCC Bilawga Maskax-layliska  
  
Julie Syring, Iskuduwaha  
Bulshada Carrurnimada Hore,  
Todos Juntos  
  
Dawn Hendricks, Barfasoorka  
Carrurnimada Hore, Kuliyadda  
Bulshada ee Clackamas

Shelly Campbell, Tababaraha  
Ballanqaadka Dugsiga ka hor,  
Agabka Daryeelka Ilmaha iyo  
Gudbinta

Erin Tamblyn, Takhasuslaha ka  
mid noqoshada Iskaashatada  
loo dhan yahay

Kelley Lawson, Agabka  
Daryeelka Ilmaha ee  
Takhasuslaha Tababarka iyo  
Gudbinta, Bilawga Maskax-  
layliska Guusha

Michelle Forrette, Isbahaysiga  
Hormarinta Ilmaha ee Oregon  
(OCDC) Mulino, xubinta qoyska

### Lincoln CIT:

Autumn Belloni, Agaasimaha  
Waxqabadka  
Hore/Barnaamijaya  
Waxbarashada Gaarka ah ee  
Carruurnimada Hore Linn-  
Benton-Lincoln ESD

Barbara Dougherty,  
Agaasimaha Xarunta  
Waxbarashada Hore ee  
Samaritan

Suzanne Miller, Agaasimaha  
Dalada Adeegyada Bulshada  
(CSC) Bilawga Maskax-layliska

Lauren Sigman, Iskuduwaha  
Waxbarashada Hore, Gobolka  
Dugsiga Degmada Lincoln

Andrea Lengel, Maareeyaha  
Waxbarashada Barnaamijka,  
CSC Bilawga Maskax-layliska

Randi Brickey, Takhasuslaha  
Caafimaadka Maskaxda iyo  
Macluumaadka Naafada CSC  
Bilawga Maskax-layliska

Jose Hernandex-Rosales,  
Pollywog/Iskuduwaha Xiriirinta  
Qoyska, Linn-Benton Kuliyadda  
Bulshada Agabka Daryeelka  
Carruurta iyo Gudbinta

### Multnomah CIT:

Lisa Grotting, Agaasimaha  
barnaamijka Carruurnimada  
Hore ee Multnomah

Robin Easton Davis,  
Iskuduwaha Sinnaanta iyo Ka  
mid noqoshada Iskaashatada  
Dugsiga Ka hor, Dugsiga  
barbaarinta ee Loogu talagalay  
DHAMMAAN

Alicia Riddle, hogamiyaha  
waalidka

Kim Larson, Ballanqaadka  
Dugsiga ka hor, Kuliyadda  
Bulshada Mt. Hood

Maria Rangel, Shabakadda  
Taageerada Naafada Waqooyi-  
galbeed

Jeanett Sealy, Iskuduwaha  
Barnaamijka Carruurnimada  
Hore ee Multnomah

Sometimes the smallest things take up the most room in your heart



Maria Gianotti, Kaaliyaha  
Agaasimaha Waxbarashada  
Gaarka ah, Dugsiyada  
Dadweynaha Portland  
  
Mina Smith, Waxbarashada  
Hore ee Multnomah  
  
Molly Day, Waxbarashada Hore  
ee Multnomah

Susan Fodell, Khabiirka Ku  
darida, Dugsiyadda  
Dadweynaha ee Portland  
  
Winne Cheung, Iskuduwaha  
Tababarka, Agabka Daryeelka  
Carruurta iyo Gudbinta

**Degmada Multnomah CIT**  
**(cont)** Sherrenaa Saint Preux,  
Syaasadda iyo iskaashiga  
Maamulaha Dugsiga ka hor &  
Qaybta Waxbarashada Hore  
(PEL) Degmada Multnomah

Lisa McConachie, Agaasimaha  
Adeegyada Loo Dhanyahay ee  
Gobolka Columbia

Mary Pearson, Agaasimaha,  
Adeegyada Gaarka ah ee  
Degmada Dugsiga David  
Douglas

# Dulmar

Haya'daha Waxbarashada Gobolka ee ka kooban nidaamka waxbarashada hore (Qaybta Waxbarashada Hore, Waaxda Waxbarashada Oregon, Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon), shabakadaha u doodista qoyska, iyo Isbadel-doonayaasha siyaasada oo la kaashaday Xarunta Caawimada Farsamada ee Carruurnimada Hore (ECTA) si ay u bixiyaan caawimad farsamo ee hirgelinta, joogtaynta, iyo kor u qaadida tayada sare ee goobaha loo dhan yahay ee dugsiga ka hor. Dadaalkan hirgalinta waxa uu ku biirayaa hormarinta, kahortaga, iyo dadaallada waxqabadka ee jira iyo kuwa la xiriira si loo dhiso aqoonta, xirfadaha, iyo kartida ay xirfadlayaasha, waalidiinta, iyo xubnaha bulshadu u baahan yihii si ay ugu doodaan, taageeraan, oo ayna u hirgeliyaan dhaqamada loo wada dhan yahay ee daryeelka hore iyo deegaanka waxbarashada. Warbixintani waxay qeexaysaa himilada, hadafka, iyo horumarka ku wajahan hirgelinta Tilmaamayaasha Qaran ee ku darista Carruurnimada Hore ee heer gobol iyo mid deegaan ee Gobolka Oregon. Tilmaamayaasha Qaranka ee Tayada Sare leh ee Ku Darida Carruurnimada Hore iyo Waaxda Waxbarashada Oregon (ODE) Mawqifka Sinaanta ayaa hagaya shaqada lagu qeexay hallkaa.

Iyada oo la raacayo nidaamka xulashada qaranka, Oregon waa mid ka mid ah labada gobol si ay u tijaabiyaan hirgelinta mashruuca ku darida, iyadoo la adeegsanayo *Tilmaamayaasha Ku darida Carruurnimada Hore ee Tayada Sare leh* si loo hago hirgelinta. Afarta qaybood ee muhiimka ah waa:

- 1) Kooxda Hogaaminta Gobolka (SLT) si ay u hogaamiyaan shaqada. SLT Tani waa hay'ad is-dhexgal, hawl-wadaag, koox iskaashato oo horamarisa oona xoojisa siyaasadaha, habraacyada, maalgelinta, horumarinta xirfada, iyo nidaamyada kale si loo qorsheeyo, loo fuliyo, loo qiimeeyo, kor loogu qaadloona joogteeyo *Tilmaamayaasha Gobolka ee Ku darida Tayada Sare leh ee loogu talagalay carrurta da'da dugsiga ka hor ah oo la ildaran naafanimo.*
- 2) Shabakadda hormarinta xirfadeed ee gobolka ee Macalimiinta Barnaamijku si ay u siiyaan caawimaad farsamo Kooxaha Isku-dhafka Bulshada iyo kooxaha hogaaminta barnaamijka deegaanka, taasoo u horseedaysa fulinta daacadnimada sare leh ee tilmaamayaasha. Qandaraaslayaasha EI/ECSE ee gobolka iyo Tababarayaasha ka socda Iskaashatada Loo Dhan Yahay ayaa FTE u qoondeeyay shan Takhasuslayaal oo Isku-dhaf ah sidii Tababarayaasha barnaamijka si ay ugu adeegaan awooddan.
- 3) Kooxaha Isku-dhafka Bulshada (CIT) si ay ugu adeegaan muujinta waxtarka tilmaamayaasha isku-dhafka oo ay u bixiyaan tusaalahu ku celcelinta. Hadda, saddex kooxood oo Isku-dhafka bulshada ah ee Gobolka Oregon ayaa u kulma si bila ah. CIT-yadani waxa ay ka kooban yihii xubnaha qoyska, qandaraaslayaasha EI/ECSE, iskaashatooyinka bulshada, iyo iskaashatooyinka wakaalada waxbarashada hore. CIT waxa ay hirgeliyeen qorshayaal tallaabo oo ku salaysan labada *Tilmaamayaasha Bulshada Isku-dhafka Tayada Sare leh* iyo *Tilmaamayaasha Barnaamijyada Maxaliga ah ee Isku-dhafka Tayada Sare leh* taas oo hagta oo taageerta helitaanka jawi waxbarasho oo loo dhan yahay oo tayo sare leh oo bulshada oo dhan ah.
- 4) Barnaamijyada Hirgelinta (IP) iyo Goobaha Bandhigga si ay u taageeraan fasallada hirgelinta *Daryeelka Hore iyo Tilmaamayaasha Deegaanka Waxbarasho ee Isku-dhafka ah ee Tayada Sare leh*. Shanta Kooxood ee Hoggaanka IP ayaa kulma bil kasta waxayna dhisayaan awooddha fulinta qorshayaasha waxqabadka, beddelka dhaqamada, iyo hormarinta siyaasadaha iyo habraacyada si kor loogu qaadloona gelitaanka, ka qaybgalka, taageerada iyo natijjooyinka ku aadan carruurta la kulma naafanimada. IP(-yada) ee ay aqoonsadeen kooxaha hogaaminta bulshada waxay u adeegi doonaan

Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir:


Meredith Villines,

Takhasuslahu Xeeladaha Wadajirka ah ee EC

[meredith.villines@ode.oregon.gov](mailto:meredith.villines@ode.oregon.gov)



muujinta waxtarka tilmaamayaasha isku-dhafka oo ay u bixiyaan tusaalaha ku celcelinta.



Jaantuska 1: Afarta Qaybood ee Hirgelinta Muhiimka ah (Wajiga 1-aad)

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Tilmaamayaasha Qaranka ee ku darista Carruurnimada Hore, fadlan booqo Xarunta Caawimaada Farsamada ee Carruurnimada Hore (<https://ectacenter.org/topics/inclusion/indicators.asp>)



Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir:

Meredith Villines,

Takhasuslaha Xeeladaha Wadajirka ah ee EC

[meredith.villines@ode.oregon.gov](mailto:meredith.villines@ode.oregon.gov)

Hawlaha Hirgelinta ilaa maanta:

**Febraayo - Juun 2020:**

- Tababarayaasha Barnaamijka La Aqoonsaday (PC-yada) ee la xiriira CIT kasta
- Shaqaalaha ECTA ee la martigeliyay waxay ka wacayan kombuyutarrada iyo iskuduwaha SLT si ay ugala hadlaan doorka CITs
- Xubnaha CIT ee la aqoonsaday, doorarka (ay ku jiraan iskuduwaha xogta), iyo saadka (wakhtiyada shirarka, goobta, iwm.)
- IP-yada la aqoonsaday iyo wakiilo ka socda mid kasta si ay ugu adeegaan CIT
- Marti galisay wicitaanka CIT si looga wada hadlo:
  - Qeexitaanka iyo doorka CIT
  - Dib u eegista hannaanka
  - Tallaabooyinka hore ee iskuduwidda iyo isgaarsiinta SLT
- Dhammaan xubnaha waxay heleen Qalabka Sanduuqa Ku darida Dugsiga ka hor (Barton & Smith, 2015)

**Sebtembar 2020 - Juun 2021**

- Waxaa martigeliyay ECTA Seminaarada bilaha ah ee ku saabsan mowduucyada lagu sheegay Sanduuqa qalabka ee Ka mid noqoshada Dugsiga ka hor
- Waxaa martigeliyey shirarka CIT bilaha ah ee ay fududeeyaan Tababarayaasha Barnaamijka iyo CIT waxay horseedaa in la hirgeliyo Tilmaamayaasha Bulshada ee ka mid noqoshada tayada Sare leh
- Margeliyo wicitaano bille ah oo lala yeesho Shaqaalaha ECTA ee Tababarayaasha Barnaamijka iyo Iskuduwaha SLT
- Waxay martigelisay afar kulan oo tababar ah oo lala yeesho Kooxaha Hogaaminta Barnaamijka ee Shaqaalaha ECTA

**Agoosto - Oktoobar 2021:**

- Wuxaan la kulmay Kooxda Hogaaminta Gobolka Illinois iyo shaqaalaha ECTA
- Ka qaybgalay Tababarka Taxanaha Seminaarada ee Dhaqanada Muhiimka ah (ka qaybgalayaasha waxaa ka mid ahaa IP-yada, Macalimiinta Barnaamijka, Hindisaha Nidaamyada Waxbarashada Hore (ELSI) tababarayaal lataliye, tababarayaal xirfadleyaal, iyo shaqaalaha EI/ECSE)
- Ka qaybgalay Taxanaha Seminaarka Tababarka Ku Salaysan Dhqanka (ka qaybgalayaasha waxa ka mid ahaa Tababarayaasha Barnaamijka, Hindisaha Nidaamyada Waxbarashada Hore (ELSI) tababarayaal lataliye, tababarayaal xirfadleyaal, iyo shaqaalaha EI/ECSE si ay uga qayb galaan)

**Oktoobar 2021 - Diseembar 2021**

- Martigeliyey Kulamada CIT ee bilaha ah
- Martigeliyey shirarka Kooxda Hoggaanka Barnaamijka bilaha ah
- Martigeliyey Barnaamijka iyo Wicitanada Tababarka Dhaqtarka bilaha ah

Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir:

Meredith Villines,

Takhasuslaha Xeeladaha Wadajirka ah ee EC

[meredith.villines@ode.oregon.gov](mailto:meredith.villines@ode.oregon.gov)



# Ku darida Carruurnimada Hore ee Oregon Kooxda Hogaaminta Gobolka

Iyada oo lala kaashanayo hay'ado badan oo u adeega carruurta iyo qoysaska, ODE waxaa ka go'an in ay fuliso siyaasadaha iyo dhaqamada dugsiga ka hor ee tayada sare leh ee loo dhan yahay ee dhammaan heerarka Daryeelka Hore iyo Nidaamka Waxbarashada (sida, gobolka, deegaanka, barnaamijka, iyo fasalka). Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gobolka iyo Iskaashatayaalka maxalliga ah, guji halkan. Kooxda Ku Darida Carruurnimada Hore ee Oregon waxay nafteeda ku saleysa caqidooyinka soo socda, himilada, iyo hadafka:

**Waxaan aaminsanahay:**

- Naafanimada waa in loo qaddariyo inay tahay qayb dabiici ah oo ka mid ah mahadhada aadanaha taas oo ka dhigeysa qoysaskeena iyo bulshooyinkeena kuwa xoog leh.
- Qoysaska waxay xaq u leeyihiin inay xiriir la yeeshaan bixiyeyaasha daryeelka hore iyo waxbarashada iyaga oo ku kalsoon in ilmahooda la soo dhawaynayo, la jeelaanayo, loona arki doono dhammaan sharaftooda bini'aadminimo, oo ay ka mid yihiin dhaqankooda, jinsigooda ama naafanimadooda.
- Dhammaan goobaha waxbarashada ee loogu talagalay carruurta yaryar iyo qoysaskooda waa inay ahaadaan kuwo loo dhan yahay, dhaqan ahaan jawaab celinaayo, iyo xaqiijinaayo aqoonsiga.
- Ilmo kastaa waa inay wax la bartaan oo ay si wadajir ah ula koraan asaagyadooda, saaxiibadooda, iyo deriskooda. Carruurta waxay ku guuleystaan naftooda ugu wanagsan marka ay koriyaan qoysas, bixiyayaal, iyo bulshooyin awooda leh.

## Ku darida maaha meel.

Bishii Sebtembar 2015, Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka (ED) iyo Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka (HHS) waxay soo saareen bayaan siyaasadeed oo kor loogu qaadayo ku darida. Marka la eego bayaankan, waxaan ku qeexnay ku darida sida:

*Ku darida barnaamijyada carruurnimada hore waxa loola jeedaa ku darida carruurta naafada ah barnaamijyada carruurnimada hore, oo ay la socdaan asaagyadooda aan naafada ahayn; hayashada rajooyin sare iyo ujeedooyin kor loogu qaado ka qaybgalka dhammaan hawlahaa waxbarashada iyo bulshada, oo ay fududeeyaan hoyga gaarka ah; iyo adeegsiga adeegyada iyo taageerada ku salaysan caddaynta si ay u kobciyaan hormarkooda (garashada, luqadda, xiriirka, jirka, habdhaqanka, iyo dareenka bulshada), saaxiibtinimada asaagyadooda, iyo dareenka lahaanshaha. Tani waxay khusaysaa dhammaan carruurta yar yar ee naafada ah, laga bilaabo kuwa naafada fudud, ila kuwa leh naafada daran.*

## Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka, Xafiiska Waxbarashada Gaarka ah iyo Adeegyada

Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir:

Meredith Villines,

Takhasuslaha Xeeladaha Wadajirka ah ee EC

[meredith.villines@ode.oregon.gov](mailto:meredith.villines@ode.oregon.gov)

- Nidaamka Daryeelka Hore iyo Waxbarashada waxaa lagu hormariyaa oo lagu xoojiya iyada oo la adeegsanayo shabakada xirfadlayaasha, waalidiinta iyo xubnaha bulshada.

**Himilo:**

Guud ahaan Oregon, waxbarashada gaarka ah ee canug kasta iyo kobcintiisa waxaa lagu koriyaa iyada oo la adeegsanayo nidaamyo, siyaasado, iyo deegaano ujeedo loogu dhan yahay.

*WAXA JIRA WAX BADAN OO WADA SHAQAYN IYO  
XAMAASAD AH OO KOOXDA DHEXDEEDA  
AH...WAXAANU HAYSANAA WAX BADAN OO AAN KA  
BARAN KARNO OO AAN KA CADEYN KARNO SHAQADA  
BULSHADA SI AANU U WARGELINO NIDAAMKA --  
WAXA LOOGA BAAHAN YAHAY HEERKA NIDAAMKA SI  
LOO TAAGEERO LOONA CABIRO DHAQAMADA LOO  
WADA DHAN YAHAY IYO TABABARKA AYAA AH WAXA*


**Hadaf:**

Iyada oo diiradda la saarayo siyaasadaha iyo dhaqamada loo wada dhan yahay ee tayada sare leh, Ku darista Carruurnimada Hore ee Oregon Kooxda Hogaaminta Gobolka waxa ay abuuri doonaan nidaam gobolka oo dhan, iskaashi leh kaas oo u oggolaanaya canug kasta in lagu taageero deegaan loo dhan yahay.

Si loo gaaro hadafkan, Gobolka waxaa uu la shaqayn doonaa Carruurnimada Hore Xarunta Caawimaada Farsamada iyo Xarunta Qaranka ee Hal-abuurka Qaabka Xaramka si loo hirgeliyo Tilmaamayaasha Qaranka ee Ku darista Carruurnimada Hore.

Loo sameeyay si loo hirgeliyo Tilmaamayaasha Gobolka ee Isku dhafka Tayada Sare, si loo wargeliyo oo looga hawlgeliyo Iskaashatada Nidaamka Waxbarashada Hore ee Oregon ee ku saabsan arrimaha saameeya carruurta yaryar ee la kulmaayo naafanimada iyo qoysaskooda, Ku daridda Carruurnimada Hore Kooxda Hoggaanka Gobolka ayaa qeexi doona tallaabooyinka loo baahan yahay si loo hubiyo helitaan siman oo daryeelka hore iyo waxbarashada iyo adeegyada ah, iyadoo diiradda la saarayo mudnaanta soo socota:

- Samee kooxaha fulinta hay'adaha kala duwan oo ah heer gobol, degmo, iyo barnaamij si ay wax uga qabtaan baahiyaha dhallaanka, socod baradka, iyo carruurta yaryar ee la kulmaayo naafanimada si ay si buuxda ugu biiraan deegaanka waxbarashada hore ee bulshadooda.
- Xoojinta iskaashiga lala leeyahay qoysaska si aragtidooda ku aaddan ilmahooda si buuxda u xaqiisadaan.
- Kordhi helitaanka adeegyada iyo taageerada iyada oo loo marayo isku duwida agabyada ah heer dowladeed iyo mid gobol.



*"Individually we are a drop but together we are an ocean."  
~Ryunosuke satoro*


4. Kor u qaad oo balaari taageerada ku aadan qoysaska, shaqaalaha waxbarashada hore, iyo barnaamijyada daryeelka hore iyo waxbarashada iyada oo loo marayo tababbarka cilmiga oo dhan iyo caawimaada farsamo.
5. Horumarinta iyo xoojinta shabakadaha gobolka ee fulinta iyo tababarayaasha xirfadlayaasha ah kuwaas oo bixin kara taageero joogto ah, shaqo ku xiran oo loogu talagalay hirgelinta Tilmaamayaasha Isku-dhafka Tayada Sare ee heer gobol, barnaamij, iyo fasalba.
6. Hormari oo xooji siyaasadaha, habraacyada, maalgelinta, iyo qaybaha kale ee kaabayaasha nidaamka ee loo baahan yahay si loo qorsheeyo, loo fuliyo, loo qiimeeyo, kor loogu qaado loona joogteeeyo tilmaamayaasha ka mid noqoshada tayada sare leh.
7. Naqshadee oo qabanqaabi qiimaynta dhammaan hawlaha waaweyn iyadoo lala kaashanayo iskuduwaha Gobolka.



Ku darida Carruurnimada Hore ee Oregon SLT waxay bixisaa hagitaan, tallo-bixin, iyo talooyin ku saabsan siyaasadda, xeerarka, iyo sharciga la xiriira ka mid noqoshada carruurta ay haysato naafanimada iyo qoysaskooda Golaha Isku xirka Hay'adaha Gobolka (SICC) iyo Golaha La-talinta Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah (SACSE) ).

Intii lagu guda jiray sanadkii la soo dhaafay, Ku darida Carruurnimada Hore ee Oregon SLT waxa ay diiradda saartay sahaminta iyo la shaqaynta bulshooyinka bilaabaya hirgelinta. Iyadoo garab laga hrлаayo ECTA iyo iskuduwaha Gobolka, SLT waxay ka maqashay CIT-yada, tababarayaasha barnaamijka, iyo tababarayaasha dhaqtarka ah wax ku saabsan guulaha iyo caqabadaha horyaala jaaliyadaha sanadka oo dhan. Intaa waxa dheer, SLT waxa ay baartay oo ay kobcisay faham korodhay oo ku saabsan shaqada isku xiran ee xubin kastaa uu u keeno SLT ka socda qaybaha ay metelaan. Koordani waxay dhamaystirtay Tilmaamayaasha Gobolka ee Isku-dhafka Tayada Sare iyo Halbeegyada Tayada Gobolka.

## Tilmaamayaasha Gobolka ee Isku-dhafka Tayada Sare - Is-Qimaynta



Ku darida Carruurnimada Hore ee Oregon SLT waxay horumar joogto ah ka samaysay Tilmaamayaasha Gobolka ee Isku dhafka Tayada Sare. Gaar ahaan, SLT waxay samaysay koox isku dar ah, fahmitaanka kordhay ee siyaasadaha waxbarashada hore iyo hagida hadda saamaynaya ku darida carruurta la itaal daran naafanimada, waxay dib u eegtay qoondaynta agabyada hadda si ay u taageerto xirfadlayaasha ka tirsan daryeelka hore iyo waxbarashada, waxayna soo saartay sawir muuqaal ah iskuduwida agabyada kobcinta xirfadeed ee loogu talagalay kuwa u adeegaya carruurta yaryar ee la itaal daran naafanimo. Iyadoo ay weheliso shaqada lagu kobcinaayo hababka maalgelinta waara ee loogu talagalay hormarinta xirfadda, wacyigelinta dadweynaha, waxbarashada qoyska, iyo ka-qaybgalka, dadaalladani waxaa laga sii wadi doonaa meelaha diiradda la saaro sannadka soo socda.

## Soo koobitaanka Hawlaha Ay Kafaala qaadeen Kooxda Gobolka

Sannadka oo dhan, SLT, oo ay weheliso ECTA, waxay isugu yeertay shirar iyo aqoon-is-weydaarsiyo oo ay u qabteen CIT-yada, barnaamijyada, iyo tababarayaasha xirfadleyda. Tababarrada loogu talagalay tababarayaasha, shaqaalahaa daryeelka hore iyo waxbarashada, iyo la-taliyayaasha waxbarashada gaarka ah ee carruurnimada hore waxay xaqijiyeen luqad wadaag ah, fahamka ku dhaqanka, iyo waqtiga si ay iskugu muujiyaan oo loo horumariyo yoolalka iyo hababka la wadaago ee hirgelinta. Intaa waxaa dheer, xubnaha SLT iyo SICC waxay ku biireen afar kulan seminaar oo heer qaran ah iyo wadahadalo lala yeeshay dawlado kale, tababarayaasha fulinta, iyo cilmi-baarayaal ka socda Xarunta Qaranka ee Hal-abuurka Qaabka Xaramka si ay uga hadlaan sinnaanta iyo Qaabka Xaramka (qaab kale oo caddayn ku salaysan oo lagu hagaajinayo shucuurta bulshada Natiijooyinka carruurta yaryar ee leh ama halista ugu jira

dib u dhac ku yimaadda hormarinta shucuurta iyo dhaqanka bulshada). Laga soo bilaabo ka-qaybgalkan, hoggaamiyeysaasha Oregon waxay awood u yeeshen inay ka hadlaan su'aalaha muhiimka ah iyo tixgelinta sinnaanta ee SLT oo ay qoto dheereeyaan fahamka ku saabsan afarta qaab ee hirgelinta muhiimka ah. Shaqadani waxay sii wadaysaa in lagu wargeliyo fahamka SLT ee isgoysyada ka mid noqoshada iyo sinnaanta, gaar ahaan marka ay la xiriirto jinsiyadda iyo qowmiyadda.

Ka mid noqoshada Caruurnimada Hore ee Oregon SLT: Waxqabadyada Wacyigelinta iyo Isku xirka Guud ahaan Nidaamka Waxbarashada Hore

- Xiriirada shaqadan ayaa ka soo muuqday wargaysyada guud ahaan nidaamyada fasalka 3aad ee dugsiga barbaarinta hore ee heer goboleed iyo mid deegaan.
- Sabuurada daashka [Hindisaha Ka mid noqoshada Caruurnimada Hore ee Oregon waxa la daawaday 562 jeer sanadkii la soo dhaafay.](#)
- [Golaha Isku-xirka Hay'adaha Dawladda \(SICC\)](#), golaha la-talinta ee Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah ee dhalashada ilaa shan, ayaa helay warar cusub oo ku saabsan hindisaha saddex jeer sanadka oo dhan.
- Hogaamiyayaasha kooxda gobolka ayaa marar badan u soo bandhigay Guddiga Guriga ee Caruurnimada Hore wax ku saabsan muhiimada ka mid noqoshada iyo dadaalka hormarinta tayada ee Daryeelka Hore iyo Waxbarashada.
- Hagidda waxa loo siidaayay Barnaamijyada EI/ECSE ee ku saabsan “[Samaynta Go'aanada Meelaynta Waxtarka leh.](#)”
- Iswaafajinta laamaha isdhaafsiga iyo iskaashiga ku saabsan hagitaanka la xiriirta COVID-19 iyo caafimaadka iyo dhaqamada badqabka leh ee jawiga waxbarashada hore.
- Iskaashiga Waxbarashada Laamaha isdhaafsiga ee leh Nidaamka Waxbarashada Hore iyo Hogaamiyayaasha Waxbarashada Hore ee Qabiilka ayaa loo qorsheeyay sidii kulan wadajir ah oo ay la yeelanayaan Qaybta Waxbarashada Hore, Waaxda Waxbarashada Oregon, Xiriirka Arrimaha Qabiilka AI/AN, iyo Iskaashatooyinka kale ee Nidaamka Waxbarashada Hore.
- Hogaamiyayaasha gobolka waxay la kaashadeen Agabka Daryeelka Ilmaha iyo Gudbinta iyo Agaasimaha Xarunta Waxbarashada Hore si kor loogu qaado xeeladaha lagu taageerayo Bixiyeyaasha Daryeelka Hore iyo Waxbarashada marka canug la kulma naafanimo uu iska diiwaangeliyo barnaamijkooda.
- Sharciga la hormaray si wax looga qabto ka joojinta iyo cayrinta ee daryeelka hore iyo waxbarashada oo muujinaya baahida dhaqan ahaan wax ka qabata, wargelinta dhaawacyada, adeegyada loo dhan yahay iyo taageerada bixiyayaasha iyo barnaamijyada ka hor mamnuucida ku saabsan cayrinta ee dhammaan daryeelka hore iyo barnaamijyada waxbarashada ee hela dhaqaalaha Gobolka ee 2026.
- 50 saacadood oo waxbarashada xirfadeed ee laamaha isdhaafsiga oo tayo sare leh si loo hormariyo hirgelinta.
- Taageerada tababarka cusub iyo caawimaada farsamo ee la soo saaray iyada oo lala kaashanayo Iskaashatooyinka Loo Dhanyahay (ODHS), Xarunta loogu talagalay

Hormarinta Xirfadda ee Daryeelka Carruurnimada iyo Waxbarashada (OCCD), Qaybta Waxbarashada Hore (ELD), iyo Adeegyada Loo Dhanyahay (ODE).

- Xubnaha SLT ee ka socda **FACT Oregon waxay u qaybiyeen in ka badan 10,000 oo ah nuqul ka mid ah Buugaaga Riyada Meel Fog Lagu Gaaro**(Dream to Go Far) ee ku aadan qoysaska leh carruurta la kulma naafanimada.
- Xubnaha SLT ee ka socda **Taageerada Naafada Waqooyi-galbeed (NWDS)**, **waxay soo saareen laba buug oo majaajilo ah oo u gaar ah si ay u taageeraan carruurta iyo dhallinyarada naafada ah si ay u dhisaan adkeysiga inta lagu jiro dhibaatada COVID-19 waxayna iskaashi la sameeyeen Maamulka Caafimaadka Oregon si ay u qaybiyaan nuquollo.**
- 100 saacadood oo ah laamaha isdhaafsiga Tababarka Qaabka Xaramka ee loogu talagalay Tababarayaasha iyo Maamulayaasha (TPOT, TPITOS, Tababarka Ku Salaysan Ku dhaqanka) kaas oo u horseedaya 40 kormeerayaal TPITOS cusub oo shahaadeysan iyo 32 kormeerayaal TPOT oo cusub oo shahaadeysan oo gobolka oo dhan ah.



## Kooxaha Isku-dhafka Bulshada



Markii uu Gobolka soo gudbiyay codsiga si uu u helo caawimaad farsamo oo degdeg ah, saddex bulsho ayaa loo aqoonsaday inay diyaar u yihin inay bilaabaan dariiqa hirgelinta iyada oo loo marayo dib u eegis degdeg ah oo ku saabsan Wax ka qabashada Hore/ Waxbarashada Gaarka ah ee Carruurnimada Hore (EI/ECSE) Qorshayaasha Aagga Adeegga, Qorshayaasha Qaybta Waxbarashada Hore, muujiyay sida ay uga go'an tahay iyo/ama waayo-aragnimadii hore ee fulinta dhaqamada caddaynta ku salaysan, iyo sidoo kale lahaanshaha iskaashi hormarsan oo ah qaybaha bulshada.

Kooxaha Isku-dhafka Bulshada (CIT) waxay u adeegaan si ay u muujiyaan waxtarka iskaashiga iyo isticmaalka tilmaamayaasha ka mid noqoshada ee heer deegaan. Iyada oo lala kaashanayo daryeelka hore iyo deegaanka waxbarashada ee u adeega carruurta yaryar iyo qoysaskooda, CIT-yadu waxay fududeeyaan qaadashada barnaamijka oo dhan iyo tilmaamayaasha deegaanka daryeelka hore ee ka mid noqoshada tayada sare leh.

Bulsho kasta waxay go'aamisa xubnimada ku habboon ee CIT-da. Xubnaha CIT ee awooda leh waxaa ka mid ah daneeyayaasha iyo kuwa isbadel-doonka ah ee bulshada dhexdeeda. Tusaalooyinka waxaa ka mid noqon kara xubnaha qoyska, hoggaamiyeyaaasha degmada, daryeelka carruurta, kalkaalinta bulshada, Bilawga Maskax-layliska, maktabadaha maxalliga ah, caafimaadka iyo adeegyada aadanaha, waxqabadka hore, waxbarashada gaarka ah ee carruurnimada hore, dhakhaatiirta carruurta, iyo bixiyayaasha caafimaadka dhimirka.

CIT kasta waxa ay fulisaa qorshayaal hawleed oo ku salaysan Tilmaamayaasha Bulshada ee ka mid noqoshada Tayada Sare leh iyo Tilmaamayaasha Barnaamijyada Maxalliga ah ee ka mid

---

*Waxaan markasta ku fikirnaa nafteena inaan si aad u wanaagsan wax uga qabaneyno marka la eego ka mid noqoshada bulshada. Tilmaamayaasha Qaranka ee Kooxaha Isku-dhafka Bulshada ayaa naga caawiyay inaan ogaano daldaloolada. Wuxay awood u leedahay inay noo noqoto ciyaar baddele.*

Hogaamiyaha CIT ee Degmada  
Multnomah, Jeanett Sealy

---

noqoshada Tayada Sare leh labadaba. Tilmaamayaashani waxay hagayaan oo ay taageerayaan helitaanka daryeel hore oo loo dhan yahay oo tayo sare leh iyo deegaano waxbarasho oo bulshada oo dhan ah.

Si aad u hesho maclumaaad dheeraad ah oo ku saabsan CITs fadlan booqo boggan: [Kooxaha Isku-dhafka Bulshada](#).

## Kooxda Isku-dhafka Bulshada Lincoln

Bulshada Degmada Lincoln waxay ka kooban tahay iskaashatayaal ka kala socda dhammaan bulshada waxbarashada hore, oo ay ku jiraan waxqabadka hore/waxbarashada gaarka ah ee carruurnimada hore, agabka daryeelka carruurta iyo gudbinta (CCR&R), iskaashatayaalka Loo Dhan Yahay, Xarunta Waxbarashada Hore ee Samaritan, Gobolka Dugsiga Degmada Lincoln, Ururka Adeegyada Bulshada, iyo Bilawga Maskax-layliska. Kooxdani waxay si hagar la'aan ah uga shaqaynaysay sidii ay wax uga qaban lahayd sinnaan-la'aanta ka jirta bulshadooda oo ay hubiso in ilma kasta uu helo deegaan waxbarasho oo tayo sare leh oo loo dhan yahay. Hindisaha ku darida Carruurnimada Hore ee Oregon waxa ay dhistaan waxqabadyadii hore ee hormarinta tayada ee bulshada dhexdeeda oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn hirgelinta wax ku ool ah ee Heerarka Tayada Bilawga Maskax-layliska, Ballanqaadka Dugsiga Ka Hor, iyo Guusha Dugsiga Hore.

*Hawsha dib u habeynta ku darida/mashruuca sanadkan waxa ay naga caawisay inaan wanaajino wada shaqaynteena hadda jirta (socota) ee ku saabsan taageeridda carruurta u qalanta ECSE inay ku guulaystaan meelayntooda bulshada dhexdeeda.*


Jill Luther, Tababaraha Barnaamijka Lincoln



Sanadkii la soo dhaafay, Lincoln CIT waxay la kulmaysay bishiiba mar si ay dib ugu eegto Tilmaamayaasha Isku-dhafka Bulshada oo ay uga wada hadlaan saameynta ficillada xeeladeed ee kordhinaya tirada carruurta ee la kulma naafanimada oo helaysa inta ugu badan adeegyada daryeelka hore iyo deegaanka waxbarashada. Tababarayaasha ku dhix milmay bulshada dhexdeeda ayaa loo aqoonsaday inay labooduba hoggaamiyaan hannaanka lagu dhisayo qaab-dhismeedyada hirgelinta si uu u waaro oo ay u siyyaan tababar tayo sare leh macallimiinta iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada hore ee gudaha deegaannada ay bulshadu dooratay.

### **Bayanka Himilada Lincoln:**

Iyadoo la waafajinayo Hindisaha Isku-dhafka Carruurnimada Hore ee Oregon, waxaan aaminsanahay in canug kastaa uu helo fursad uu wax ku barto oo uu si wadajir ah ku horumariyo asaagyadooda, saaxiibadooda iyo deriskooda. Dhammaan goobaha waxbarashada ee loogu talagalay carruurta yaryar iyo qoysaskooda waa inay ahaadaan kuwo loo dhan yahay, dhaqan ahaan jawaab celinaayo, iyo xaqijinaayo aqoonsiga. Hadafkeena waa inaan dhisno oo aan joogteyno dhaqamada caruurnimada hore ee bulshada loo dhan yahay ee buuxinaya baahiyaha dhammaan carruurta iyo sidoo kale taageeridda carruurta baahiyaha gaarka ah leh iyada oo loo marayo deegaano waxbarasho oo tayo sare leh.



Iyada oo ku saleysan Tilmaamayaasha Bulshada iyo Qaybaha Isku-dhafka Tayada Sare leh iyo dib-u-eegista xogta kale, Lincoln CIT waxay ka shaqeyneysaa dhisidda wacyigelinta, tababarida si loo dhiso awoodda saddexda goobood ee bulshada, hormarinta hormarka xirfadeed ee la wadaago, iyo aqoonsiga heshiisyada hay'adaha ee sii wadida dhaqamada loo dhan yahay. Tallaabooyinkan ujeedada leh ee lagu kordhinayo ka mid noqoshada tayada sare leh, kooxda waxay rajaynaysaa inay kordhiso tirada carruurta la kulma naafanimada kuwaas oo helaya dhammaan adeegyadooda guud ahaan daryeelka hore iyo deegaanka waxbarashada ilaa 30% marka la gaaro 2023. Shaqada Lincoln CIT ee labada sano ee soo socota waxay diiradda saari doontaa qorsheynta si loo joogteeyo maalgelinta iyo cabbirka dhaqamada loo dhan yahay. Xogta ka socota qoysaska, barnaamijyada bulshada, iyo xirfadlayaasha waxbarashada hore ayaa ogeysiin doona shaqadan. Natiijooyinka dadaallada qorsheynta iyo xogta labadaba waa la wadaagi doonaa.

*Carruurta qabta awtisimka mararka qaarkood waxay qabaan walaac bulsheed. Ka bixitaanka fasalka ECSE u gudubida dugsiga barbaarinta ka hor ee bulshada waxay naga caawisay inaanu aragno inuu ku guulaysan karo fasalka wayn waxayna naga caawisaa inaanu ogaano inuu sidoo kale u gudbi karo dugsiga barbaarinta.*

Degmada Lincoln waalidka haysta ilmaha qaba cudurka autism-ka

## **Kooxda Isku-dhafka Bulshada Clackamas**

Waxay ka kooban tahay hogaaminta ka socda Clackamas ESD, Xarunta Waxbarashada Hore, Bilawga Maskax-layliska, Ballanqaadka Dugsiga Ka hor, CCR&R, Todos Juntos (ururka bulshada ee u adeega dhallinyarada iyo qoysaska miyiga Degmada Clackamas), Degmada Dugsiga West Linn-Wilsonville, iyo Kulliyada Bulshada Clackamas, Clackamas CIT ayaa la kulma bishiiba mar, xitaa inta lagu jiro masiibada iyo dabka ba'an. Iyada oo la waafajinayo Qorshaha Qaybta Waxbarashada Hore iyo yoolalka Qorshaha Adeegga EI/ECSE, Clackamas CIT waxay hormarisay himilada soo socota taasoo hagaysay waxqabadka illaa sannad adag. Kooxdan shaqsiyaadka ah ee u heellan waxaa ka go'an inay ballaariyaan waxayna hadda qorayaan xubno si ay u muujiyaan kala duwanaanshiyaha bulshada.

### **KU DARIDA**

*Ka darida waa xaalad la qiimeeyo, la xushmeeyo lana taageero. Waxay ku saabsan tahay diirad saarida baahiyaha shaqsi kasta iyo hubinta in xaaladaha saxda ah ay jiraan si qof walba uu u gaaro awoodiisa buuxda.*

**Waaxda Guriyeynta iyo Hormarinta Magaalooyinka ee Maravkanka**

## **Bayanka Himilada** **Clackamas:**

Waxaan aaminsanahay in bixinta fursado tayo sare leh oo lagu hormarinayo luqadda, xiisaha, iyo xirfadaha dareenka-bulsheed ay dhacaan marka dhammaan carruurta ay si wadajir ah wax u bartaan.

Waxbarashada carruurnimada hore ee tayada leh waa xeelad caddayn ku salaysan oo loogu talagalay kor u qaadista


sinnaanta, xirida daldaloolada fursadaha, iyo hormarinta farxad iyo waxbarasho buuxda oo ku aadan dhammaan carruurta. Degmo loo dhan yahay ahaan, waxaanu mudnaanta siinaa helitaanka barnaamijiyada dugsiga ka hor ee loogu talagalay dhammaan carruurta, gaar ahaan ardayda la diiwaangeliyay ee leh kala duwanaanshiyaha waxbarashada ama caqabadaha, iyo kala soocidda waxbarashada dugsiga ka hor si loogu guuleysto dhammaan dhinacyada dugsiga.

### **...Inclusion**

The desired results of inclusive experiences for children with and without disabilities and their families include a sense of belonging and membership, positive social relationships and friendships, and development and learning to reach their full potential. The defining features of inclusion that can be used to identify high quality early childhood programs and services are **access, participation, and supports**.

(DEC/NAEYC, 2009)

COMMUNITY INDICATORS AND ELEMENTS OF HIGH-QUALITY INCLUSION (FIELD REVIEW)





In kasta oo masiibadani ay sababtay weecashada qorshayaasha iyo isbaddelka degdeggaa ah, kooxdu waxay sii waddaa inay samayso hormaro waaweyn oo xagga waxqabadka ah. Iyada oo diiradda la saarayo wacyigelinta dadweynaha iyo kordhinta iskaashiga ku saabsan hormarinta xirfadeed ee tayada sare leh iyo tababarka, kooxdu waxay soo saartay qorshe cusub oo isgaarsiinta warbaahinta ah. Ololahan waxa ujeedadiisu

tahay in la wadaago dhacdooyinka iyo macluumaadka ku saabsan muhiimada muhiimka ah ee ka mid noqoshada koontooyinka baraha bulshada iyada oo la adeegsanayo hal ku dhiga "#kor u qaad ku darida" si kor loogu qaado dadaalka waxbarashada hore ee degmada.

Xubnaha Clackamas CIT waxay sidoo kale la kaashanayaan tababarayaasha khabiirada ah ee gobolka si ay u bixiyaan tababar ku saabsan ku darida tayada sare leh iyo dhaqamada qaabakka xaramka ee bulshada.

---

*Waxaanu jeelaan lahayn inaan ku darno tababarayaal kale oo degmada ah kuwaas oo taageera barnaamijyada daryeelka ilmaha iyo barnaamijyada Bilawga Maskax-layiska si aan u ballarin karno shaqada mustaqbalka, xoojinta iskaashiga, ugana faa'iideysano fursadda tababarka.*

Deyrtan, kooxda waxay si wadajir ah uga shaqeeyeen inay u dabaaldegaan oo ay ugu mahadnaqaan shaqada bixiyeyaasha daryeelka hore iyo

Xubinta CIT (Ku saabsan Taxanaha Tababarka Dhaqamada)

---

waxbarashada, iyaga oo siinaya dhiiragelin kuwa ka qaybqaatay. Dadaalkan laamaha isdhaafsiya waxaa ka mid ah dhisidda awoodda tababarka gudaha barnaamijyada CCR&R iyo EI/ECSE iyada oo loo marayo tababbarka, iskaashiga kordhinta, iyo taageerada. Kooxda waxay ku dadaalaysaa inay qiimeyeen baahiyaha hormarinta xirfadeed ee mustaqbalka ee bixiyeyaasha daryeelka ilmaha, dib u eegaan tilmaamayaasha bulshada iyo qaybaha ku darida ee tayada sare leh, oo ay waafajiyaan qorshahooda waxqabadlka dadaallada lagu xaqijinayo helitaanka caalamiga ah ee dugsiga ka hor ee Degmada Clackamas.

Tallaabooyinkan ujeedada leh ee lagu kordinayo ka mid noqoshada tayada sare leh, kooxda waxay rajaynaysaa inay kordiniso tirada carruurta la kulma naafanimada kuwaas oo helaya dhammaan adeegyadooda guud ahaan daryeelka hore iyo deegaanada waxbarashada ilaa 65% marka la gaaro 2023. Shaqada Clackamas CIT ee labada sano ee soo socota waxay diiradda saari doontaa qorsheynta si loo joogteeyo maalgelinta iyo cabbirka dhaqamada loo dhan yahay. Xogta ka socota qoysaska, barnaamijyada bulshada, iyo xirfadlayaasha waxbarashada hore ayaa ogeysiin doona shaqadan. Natijjooyinka dadaallada qorsheynta iyo xogta labadaba waa la wadaagi doonaa.



## **Kooxda Isku-dhafka Bulshada Multnomah**



Degmada Multnomah waxa ay muddo dheer caan ku ahayd wada shaqayn qoto dheer oo ka dhaxaysa nidaamyada bulshada si loo hubiyo helitaan siman oo adeegyo iyo taageerooyin tayo sare leh. 2020, codbixiyayaasha waxay ka gudbeen Dugsiga Ka hor ee Loogu talagalay Dhammaan si loo hubiyo in carruurta ku dhalata 5 ay helaan daryeel hore oo tayo sare leh iyo waxbarasho. Dugsiga Ka hor ee loogu talagalay Dhammaan waxay sidoo kale hubin doontaa in xirfadlayaasha waxbarashada hore la siin doono


magdhow iyo in la siiyo tababaro iyo taageerooyin tayo sare leh, oo ay ka bilaabayaan bixiyeyaasha ugu fog maalgashiga. Gudbinta Dugsiga Ka hor ee loogu talagalay Dhammaan ee Degmada Multnomah waxay ku soo beegantay iyada oo la siinayo kaalmada farsamo ee degdegga ah ee Xarunta Caawimaada Farsamada ee Carruurnimada Hore (ECTA) iyo Xarunta Qaranka ee Hal-abuurka Qaabka Xaramka (NCPMI). Isku raacidaan ayaa horseeday wadahadalo badan oo kooxda ku darida bulshada ah oo ku saabsan sida isgoysyada labadan dadaal ay u taageeri karto bixiyeyaasha, qoysaska, iyo carruurta Degmada Multnomah.

Iyada oo loo marayo masiibada, Multnomah CIT waxay la kulantay si ay ula shaqeysa ECTA iyo bulshooyinka kale si ay u baarto qaybaha muhiimka ah ee xaqijinaaya ku darida laga soo bilaabo bilawga. Ka qaybgalayaasha ka tirsan Kooxda Hogaaminta CIT ee Multnomah waxaa ka mid ah hogaaninta ka socda Barnaamijka Carruurnimada Hore ee Multnomah (EI/ECSE), Dugsiga Degmada David Douglas, Dugsiyada Dadweynaha Portland, Bilawga Maskax-layliska, Ballanqaadka Dugsiga ka Hor, Taageerada Naafada Waqooyi-Galbeed, Dugsiga Ka hor ee loogu talagalay Dhammaan, CCR&R, Hormarinta Ilmaha Madow-PDX , Adeegyada Loo Dhanyahay ee Gobolka Columbia, iyo Waxbarashada Hore ee Multnomah.

### **Himilada Kooxda Isku-dhafka Bulshada Multnomah:**

Waxaan u joognaa inaan kordhino awoodda iyo fahamka ku dhaqanka sinnaanta iyo ka mid noqoshada iyo wacyigelinta qoysaska iyo bixiyeyaasha carruurnimada hore ee Degmada Multnomah si dhammaan carruurta iyo qoysasku ay u helaan deegaan tayo sare leh, dhaqan ahaan ku habboon, deegaanada waxbarashada hore oo doorashadooda ah, halkaas oo dhammaan carruurta ay awood u yeelan karaan inay sare u qaadaan. kartidooda.

COMMUNITY INDICATORS AND ELEMENTS OF HIGH-QUALITY INCLUSION (FIELD REVIEW)



Kadib dhamaystirka Tilmaamayaasha Bulshada iyo Qaybaha ka mid noqoshada Tayada Sare leh, Multnomah CIT waxay xooga saartay dadaalkooda ku wajahan waxqabadyada ku aadan meelaha soo socda: Kadib dhamaystirka Tusayaasha Bulshada iyo Qaybaha ka mid noqoshada Tayada Sare, Multnomah CIT waxay diirada saartay dadaalkooda ku wajahan waxqabadka meelaha soo socda: Taageerada Barnaamijka ee Hormarinta Xirfadlayaasha, la wadaagida tilmaamayaasha leh barnaamijyada iyo ka caawinta barnaamijyada isticmaalkooda tilmaamayaasha, iyo taageeridda kooxaynta iskaashiga oo leh tababarayaal ka mid ah. Iyadoo la kaashanayo CCR&R iyo Adeegyada Loo Dhanyahay ee Gobolka Columbia, Degmada Multnomah waxay ka shaqaynaysaa sidii ay u hubin lahayd daryeelka hore iyo bixiyayaasha waxbarashada inay helaan tababar tayo sare leh iyo tababaro ku saabsan dhaqamada bartirmaameedka u ah ka mid noqoshada buuxda ee carruurta yaryar ee la kulma naafanimada. Intaa waxaa dheer, CIT waxay eegaysaa caqabadaha jira ee ah in la yeesho xiriirada dhab ah oo ujeedada leh ee dhammaan iskaashatayaalka nidaamka, gaar ahaan ku saabsan qorshaynta iyo taageerada loo baahan yahay meelaynta joogtada ah ee carruurta yaryar ee la kulma naafanimada daryeelka hore iyo deegaanada waxbarashada.



Tallaabooyinkan ujeedada leh ee lagu kordhinayo ka mid noqoshada tayada sare leh, kooxda waxay rajaynaysaa inay kordhiso tirada carruurta la kulma naafanimada kuwaas oo helaya dhammaan adeegyadooda guud ahaan daryeelka hore iyo deegaanka waxbarashada ilaa 60% marka la gaaro 2023. Multnomah CIT waxay ka shaqaynaysaa qorshooyin lagu joogteynayo maalgelinta laguna

cabbirayo dhaqamada loo dhan yahay. Xogta ka socota qoysaska, barnaamijyada bulshada, iyo xirfadlayaasha waxbarashada hore ayaa ogeysiin doona shaqadan. Natijjooyinka dadaallada qorsheynta iyo xogta labadaba waa la wadaagi doonaa mustaqbalqa dambe.

---

*Waan jeclahay taa waxaad ku dartay "Doorashadooda"!!! Qoysaska waxa ay muujiyeen inay inta badan dareemeen in lagu qasbaayo goobo cayiman sidaa awgeed inay tan keenan qaybta hore waa mid awood badan!*

Xubinta qoyska iyo tababaraha bulshada

---

## Soo koobida

### **Waa maxay waxaanu baranay?**

Intii lagu guda jiray labadii sano ee la soo dhaafay, waxaanu ogaanay in ka qaybqaadashada hogaamintu saxda ah, la wadaago ee loogu talagalay isbaddelka nidaamyada ay qaadato waqtii, kalsoonii, iyo isfaham la wadaago. Tiro dadaallo ah oo ka shaqeeya Nidaamka Waxbarashada Hore ee Oregon si kor loogu qaado tayada fududaynta ka mid noqoshada; in la dhiso awoodda guud ahaan nidaamka si loo mideeyo kooxeyn waxtar leh. Hindisaha Tilmaamayaasha isku darida waxay ku biiraan ka hortagga, hormarinta, iyo dadaallada waxqabadka kale si loo diyaariyo nidaamyada iyo xoogga shaqada si loo hormariyo sinnaanta, helitaanka, iyo taageerada, taasoo horseedda natijjooyin la wanaajiyey. Dhisidda dadaalladan iyo ku biirista dadaallada ka hortagga iyo awoodda shaqalaha kale waa lama huraan. Si loo dhiso nidaam tayo sare leh oo dhaqan ahaan jawaab celinaayo, loo wada dhan yahay, xaqiinayo aqoonsiga iyo korriin ahaana ku habboon, shaqadan laguma samayn karo si gooni ah hal nidaam oo iskaashi ah. Waa lagama maarmaan in shaqada taageerida carruurta iyo qoysaska ay horay u socdaan oo si wadajir ah ula dhaqmaan bulshooyinka, sare u qaadida guulahooda.

### **Tallaabooyinka Xiga ee loogu talagalay 2022:**

1. ECTA waxay caawisaa hogamiyeyaasha Gobolka si ay u hormariso dhaqanka bulshada ee lagu beegsanayo mawduucyada la xiriira tilmaamayaasha loogu talagalay SLT,

Barnaamijka iyo tababarayaasha Xirfadlaha ah, tababarayaasha bulshada iyo Hogaamiyaasha CIT si ay u wadaagaan waxna uga bartaan midba midka kale.

2. ECTA waxay bixisaa taageero si wax looga qabto kor u qaadida iyo joogtaynta ee jiilaalka/guga ee 2022:

*Wixii SLT ah:*

- Tixgeli baaxadda tababbarka barnaamijka. IICs/PC-yadu waa inay wadaagaan waxyaabo gaar ah oo ku saabsan qadarka wakhtiga iyo dadaalka ay qaadanayso in doorkan si guul leh loo qabto.
- Aqoonso bulshooyinka cusub ee ku soo biiraya kooxda sannadka labaad.
- Diiрада saar is-qimaynta heerka Gobolka oo dooro tilmaamayaasha si aad u hagto qorshaynta iyo cabbiridda hormarka lagu dhisayo kaabayaasha Gobolka si loo taageero ka mid noqoshada tayada sare leh.
- Aqoonso ilo badan oo xog ah si loo hubiyo in kuwa ka fog agabyada iyo taageerada inay helaan tababar tayo sare leh, la heli karo iyo ka qaybqaadasho loo dhan yahay, iyo daryeelka hore iyo waxbarashada loo dhan yahay.

Ku aadan Kooxaha Isku-dhafka Bulshada:

- Samee qorshe hawleed loogu talagalay diiwaangelinta barnaamijyo ama goobo cusub. Tan waxaa ka mid noqon kara:
  - Soo saarida hannaanka codsiga
  - Qeexida hannaanka xulashada
- Soo saarida tababarooyin si loo daboolo baahida bixiyayaasha cusub iyo kuwa jira
- Joogteynta taageerada barnaamijyada asalka ah

Wixii ah Tababarayaasha hirgelinta barnaamijka iyo ka mid noqoshada:

- ECTA waxa ay sii wadi doontaa bixinta taageerada Tababarayaasha Barnaamijka ku saabsan hirgelinta bulshooyinka dheddooda.
- ECTA waxay ka caawin doontaa tababarayaasha la qabsiga iyo hormarinta taxanaha seminaarka CIT ee loogu talagalay bulshooyinka cusub (oo lagu sameeyay macnaha guud ee ka mid noqoshada tababarida bulshada ee wicitaanada waxqabadka).
- Tababarayaasha waxay la soo bixi doonaan faham qoto dheer oo ku saabsan sida loo hirgeliyo tilmaamayaasha bulshada (oo lagu sameeyay macnaha guud ee ka mid noqoshada tababarida bulshada ee wicitaanada waxqabadka).
- ECTA waxay ka caawin doontaa tababarayaasha la qabsiga Kooxda Hogaaminta Barnaamijka iyo Dhaqamada Muhiimka ah ee Seminaarada si loo bixiyo sanad walba.

Saamaynta muddada gaaban ee tallaabooyinkan waxaa ka mid ah:

- Isku waafajinta iyo isku-dubbaridka siyaasadda, tallooyinka ku dhaqanka, iyo hagitaanka koogu talagalay bixiyayaasha iyo xirfadlayaasha kale ee u adeegaya carruurta yaryar ee la kulma naafanimada iyo qoysaskooda.

- Isku-xiran, horumarinta xirfadeed ee shaqada ee lagu beegsanayo baahiyaha dhallaanka, socod-baradka, iyo kuwa aan gaarin dugsiga-ka-hor ee la kulma naafanimada bixiyayaasha daryeelka hore iyo waxbarashada iyo shaqaalaha waxbarashada gaarka ah ee u adeegaya nidaamka waxbarashada hore ee Oregon.
- Sheeko muhiim ah oo ku saabsan sinnaanta jinsiyadda, kartida, iyo nidaamyada kale ee ka midka ah dulmiga baahsan.
- Kobaca luqadda la wadaago, qeexitaannada, iyo fahamka hababka dhaqamada kala duwan ee ku aadan fahamka naafada.
- Fahamida qotada dheer ee xogta nidaamka waxbarashada hore.
- Aqonta iyo fahamida korortay ee maalgelinta iyo agabyada kale ee fududeeya ka mid noqoshada tayada sare leh.

Saamaynta muddada-dheer:

- Ku qanacsanaanta korodhay ee adeegyada EI/ECSE iyo taageerooyinka.
- Awood kordhintaa si wax looga qabto baahiyaha korriinka ee ilmo kasta oo daryeelka ku jira.
- Taageerada iyo adeegyada dhaqan-celinta ee la isku dubariday ee ku aadan carruurta yaryar ee la kulma naafanimada.
- Cadaadiska iyo qalbi-jabka oo yaraaday dhammaan bixiyayaasha waxbarashada hore iyo xirfadlayaasha.
- Dhacdooyinka ka joojinta iyo cayrinta oo yaraaday.
- Siihaynta iyo qorista ee ku korodhay gudaha bulshooyinka iyo barnaamijyada helaya taageerooyinka fulinta iyo tababarida.
- Isku-dubbaridka iyo iswaafajinta la xoojiyay ee isku dheelitirka baahiyaha qoysaska iyo carruurta leh hay'ado waxbarasho.

### **Mahadnaq**

Wax ka mid ah shaqadan ma suurtagasheen haddii aysan jirin lahayn dadaallada aan daalin iyo go'aanada aan kala go'a lahayn ee qoysaska, iskaashatada bulshada, bixiyayaasha waxbarashada hore iyo shaqaalaha waxqabadka hore.

Si aad u hesho faahfaahino dheeraad ah oo ku saabsan Iskaashatada Dowlada iyo Gobolka, fadlan raac [xiriiriyaahan](#). Isbahaysigan isbedel-doonka ah wuu sii kordhaya. Fadlan la xiriir shaqaalaha Waaxda Waxbarashada ee Oregon iyo iskaashatooda si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida looga qaybqaato.